

## Hordhac

Diiwaangelinta codbixiyayaashu waxa ay ka bilaabantay dhammaan gobollada Somaliland 16kii Jeenarweri ee 2016, wawa ay dhammaatay Sebteember 2016, wawa na gadh-wadeen ka ahaa Guddida Doorashooyinka Qaranka ee Somaliland (GDQ). Hay'adda horumarinta caalamiga ah ee Progressio, Waaxda Qorshaynta Horumarka ee Jaamacadda University College London (UCL) iyo xubno ka mid ah Somaliland Focus (UK), ayaa goobjoog ka ahaa habka diiwaangelintu u socotay. Hawlgalka kormeerka doorashooyinka ee caalamiga ah wuxuu ku salaysnaa dariiqii ay raaceen kormeerkii doorashooyinka ee caalamiga ahi doorashadii Golaha Wakiillada Somaliland ee 2005kii, doorashadii madaxwaynaha ee 2010kii iyo doorashadii Golaha Deegaanka ee 2012kii.



Afo isu diiwaangelinaysa si ay u codayso doorashada, oo adeegsanaysa sawirqaadaha "Biometric iris scanner". Goobtu waa miyiga Ceel Afwayn.

Ujeeddada hawlgalkani wuxuu ahaa in ay ummada Somaliland iyo hay'adaha caalamiga ahi ogaadaan muhiimadda iyo tayada diiwaangelinta codbixiyayaasha. Doorashada soo foolka leh ee madaxwaynaha sannadka 2017-ka wawa saamayn wayn ku yeelan doonta inay si sharci ah oo xalaal ah u dhacday diiwaangelinta codbixiyuhu. Somaliland waa dalkii ugu horeeyey ee Afrikaan ah ee loo sameeyo diiwaangelinta codbixiyayaasha ee caalamiga ah ee ku salaysan software-ka loo yaqaan *Iris-recognition software*, habkan wawa la filayaa in uu ka hortago diiwaanglin soo noqnoqta iyo musuqmaasuqa codaynta. Laga soo bilaabo 2008dii ilaa 2010kii in la helo hab lagu diiwaangaliyo cobixiyayaasha Somaliland waxay ahayd geedka go'an lagu hawlanaa hirgalinteeda, muddadii lagu guda jiray hawshan dhaqan galinteeda qabiilooyin kala duwan waxay ku guubaabiyeen xubno ka tirsan reerahooda inay isdiwaan galiyaan laba ama ka badan si ay saamayn badan ugu yeeshaan siyaasadda dalka. Rajada laga qabo kalsoonida liiska codbixiyayaasha la diiwaangaliye oo sugani markan waa mid aad u sarraysa, marka la eego khaladaadka caadi ah ee inta badan ula kaca ah ee ka muuqda diiwaangelinta codbixiyayaasha dalalka kale ee Afrikaanka ah, iyo caqabahahii lala kulmay muddadii lagu guda jiray dhaqangaliinta diiwaangelinta codbixiyayaasha doorashooyinkii hore ee Somaliland. Helitaanka diiwaangelin lagu kalsoonaan karo waxay doorashooyinka soo socda u noqon doontaa tallaabo hore loogu qaaday geeddi socodka labaatan jirsaday ee lagu dhisayay qaran dimuqraaddi ah ee Somaliland, taas oo ka mid ah baadigoobka aqoonsi caalami ah. Codbixiyayaasha aannu waraysannay waxay carrabaabeen isa saamaynta, inay diiwaangelinta codbixiyaashu saldhig u tahay doorasho xalaal ah oo lagu kalsoonaan karo, taasoo lama huraan u ah aqoonsi caalami ah oo Somaliland hesho.



Sawir ugu baaqaya muwaadiniinta si ay u taageeraan codsigii Wasaaradda Arrimaha Debedda ee lagu doonayay aqoonsiga Somaliland. Wawa boodhku taagnaa xilligii ay socotey diiwaangelinta codbixiyahu.



Boodh xayaysiis ah oo ka hadlaya diiwaayngelinta codbixiyaha, Berbera.

Guud ahaan shaqada diiwaangelinta codbixiyayaasha ee ay qabteen GDQ waxay ku dhammaatay guul iyo nabad, waxana loo soo agaasimay si habaysan oo tayo leh. Shaqada ay qabteen GDQ shaqaaleheedu waxay ku suntantay oo lagu gartaa niyadsami iyo diiwaangelin hab xirfadysan oo madaxbannaan loo dhammaystiray

Si kastaba ha ahaatee, wali caqabado ayaa jira. Ma cadda sida diiwaangelinta kama danbaysta ah loo soo bandhigi lahaa, iyo sida GDQ ay u sii wadi lahayd ku shaqaynta joogtada ah ee diiwaangelinta codbixiyayaasha. Caqabadda ugu wayn ee soo socotaa ma aha uun sii-waditaanka shaqadan ee farsamo balse waxa iyana muuqata khatar siyaasadeed. Haddaba GDQ way ka war haysaa xaasaasinnimada ku lifaaqan xogta diiwaangelinta codbixiyayaasha ee u baahan taxadirka iyo dhawrsanaanta, gaar ahaan marka loo daadago heer degmo. Wuxuu aannu qabnaa, caqabadda ugu wayn ee soo fool leh waxay la xidhiidhaa bandhigidda xogtaas. Geeddi socodka waa in loo maareeyaa si taxaddir badan ku dheehan yahay, waa se in la soo bandhigaa diiwaangelinta codbixiyayaasha heer degmo si wadahadallada doorashooyinku – sida goobaha codbixinta iyo qoondaynta kuraasta baarlamaanku – u dhici karto hab qoondaysan.

## Gunaanad

Waxa aannu aad ugu faraxsannahay soo jeedimahii aannu ku soo saarnay warbiximihii doorashooyinkii hore in la saxay, gaar ahaan tan ah in la sameeyo is diiwaangelin codbixiye oo sugar oo la isku hallayn karo, lana aaminsan yahay. In kastoo aanay shaqadu dhammaan haddana waxay u muuqataa in si qiime leh oo ceeb ka saliim ah loo agaasimay.

Caqabadaha hor taagan waxay u eeg yihiin qaar siyaasadeed balse aan ahayn qaar farsamo. Sida ku xusan bilowga warbixintan, shaacinta diiwaangelinta oo dhamays tiran ilaa heer degmo waxa ay horseedi doontaa dood iyo muran hor leh oo ku saabsan qoondeynta tirada kuraasta ee baarlamaanka iyo inta gobol walba ka fadhiyi doonta. GDQ xaasaasinnimada arrinkan way dareensan yihiin waanay ka taxaddireen sii daynta iyo shaacinta xogtan. Wuxaan arrinkan ku eegnay soojeedinta kowaad ee hoos ku qoran.

Waxaa na niyad wanaajiyey ka qaybgalka xooggan ee rag iyo dumarba leh ee isdiiwaangelinta codbixiyeasha meel kasta oo Somaliland ah. Si kastaba ha ahaatee waxaannu dareensannay ku yaraanta saaxadda siyaasadda ee dumarka guud ahaan. Dumarku iyaga oo arka in dantoodu iyo masiirkoodu dhex yaallo baarlamaanka, haddana waxa ay isu diiwaangelinayaan inay codeeyaan oo kaliya. Waxaa jirta baahi degdeg ah oo loo qabo in dib loo furo dastuurka Qaranka Somaliland, gaar ahaan arrimaha khuseeya sinnaanta xuquuqda lamaanaha iyadoo la eegayo xaaladda deegaanka. Dawladda Somaliland waxay samayn kartaa inay abuurto deegaan ku habboon ka qaybgalka siyaasadda dalka ee dhinaca haweenka oo noqda mid la taaban karo.



Goobta diiwaangelinta codbixiyaha, Marawada, Sanaag.

Waxa ka mid ah inay dawladda Somaliland ka hordegto dareenka taban ee ku aaddan inay dumarku qaban karaan jagooyinka siyaasadeed qaarkood kana qaybgalaan hoggaanka, isla markaana ay beddesho jarjanjarrooyinka laga soo kori karo siyaasadda oo hadda ku eeg mid qabiil. Si caqabaddaas meesha looga saaro waa in dumarka loo sameeyaa Quota, anba "tiro cayiman oo loo asteeyey dumarka"; in la baabi'yo isxaqiraadda dhinaca siyaasadda ee noqtagay qayb ka mid ah qaab bulsheedka, lagana dhigaa meel loo wada siman yahay.

Faallooyinkaasi si toos ah ulama xidhiidhaan diiwaangelinta, balse waa shariyeynta nidaanka siyaasadeed guud ahaan.

## Talooyin soo jeedin

### Faafinta Xogta Diiwaangelinta Codbixiyayaasha

- Talo soo jeedintayada ugu wayni waxay la xidhiidhaa sii daynta xogta diiwaangelinta codbixiyayaasha. Geedisocodkani wuxuu noqondoonaas xasaasi marka dhanka siyaasadeed laga eego, sidaasi darteed waa in si taxaddir leh loo agasimo. Si kastaba ha ahaatee, waxaa muhiim ah in xogta si heer degmo loo soo bandhigo, si looga wada hadlo goobaha codbixinta, qoondaynta kuraasta baarlamaanka iyo arrimaha la xidhiidha maamulka si doorashadu hab la sii spoondeeyey ugu dhacdo.

### Agaasinka Xarumaha Diiwaangelinta Codbixiyayaasha

- Xarun kasta oo codbixeeneed waa in loo diyaariya madal laga codayn karo, la isku diiwaangelintu karo si fudud loogu shaqayn karo, isdiwaanliyayaashana aan cidhiidhi ku ahayn.
- GDQ waxay diyaarisay tilmaame faahfaahsan oo ku saabsan sida xarumaha loo agasimayo. Si loo hubiyo hawsha ka socota xarumaha oo dhan waxa loo baahanyahay shaqaale tababarao oo nidaamka looga shaqaynayo xarumaha la qabsaday, guud ahaan Goobaha Isdiwaangelinta.
- Agaasimayaasha doorashoooyinku waa inay isticmaali karaan tirakoobkii doorashoooyinkii hore dadka codeeyey si loo hubiyo in ay haystaan waraaqo ku filan oo lagu codayn karo; islamarkaana ay isla eegaan isudhiganka tirada codbixiyeyasha iyo adeegayaasha goobta isdiwaangelintu, si looga hortago kuyuu aad u dheer.
- U hoggaansanaanta xeerar adag oo ku saabsan xilliga si rasmi ah loo furayo iyo xilliga si rasmi ah loo xidhayo, oo aanay saamayn dibadeed ama faragelin shisheeye ku jirin. Si loo hubiyo diiwaangelinta in aanu shaqaalahu daalin, masuuliyiinta doorashada waa in la qorsheeyo jadwalka shaqada si loogu oggalaado xili ay soo yara nastaan, xilliada salaadda iyo xilli ay wax cunaan. Jadwalkan waa in si cad loo wada gaadhsiyyaa dhammaan diiwaangaliyayaasha iyo shaqaalahay Hay'adda Isdiwaangelinta, si loo hubiyo in aan cidna laga reebin waa in la shaaciyaan saacadaha shaqada.
- Waa in la helaa meel ku habboon saraakiisha bilayska Goobta Isdiwaangelinta codbixiyayaasha; lana hubiyyaa in ay taasi u hoggaansan tahay xeerkanka GDQ.
- Xidhiidhin online ah oo sugar haddii ay maangal tahay waa in la helaa si looga hortago, soo noqnoqodka ama in qof is diiwaangaliyo in ka badan hal mar.

### Wacyigelinta codbixiyaha

- Waa in la hirgalayo habab wacyigalin ku saabsan xilliada is diiwaangelinta, laguna faafiyaa dhammaan baraha ay bulshadu ku kulanto, telefonka gacanta, intertenka, boodhadhka iyo dhammaan meelaha wax lagu xayeesiyo. Reedhiyoga, muuqaalbaahiyaha iyo jaraa'idada waxay ku kooban yihii magaaloooyinka waawayn, sidoo kale baabuurta la dul dhigo sameecaduhuna tirada dadka ay gaadhayaan way kooban tahay.
- In kasta oo ay Hay'ado aan dawli ahayn ay ka shaqeeyaan wacyigelinta codbixiyaha, ma cadda door nidaamsan oo buuxin kara baahida loo qabo, sidoo kale ma wada gaadhsisana dhammaan gobolada dalka tusaale ahaan Gobolka Sool walaac siyaasadda iyo ammaan ayaa keenay in wacyigalin kooban oo ku saabsan nidaamka diiwaangelinta ay gaadho, inkasta oo hawlgeinta firfircoo ee hoggaamiyayaasha dhaqanku ay sameeyeen uu kor u qaaday heerka ka qaybgalka diiwaangelinta, Odyaal dhaqameedku waxay mustaqbalka ku yeelan doonaan door nidaamsan. Xidhiidh u dhexeeya Ururrada Bulshada iyo Guddiga Doorashoooyinka Qaranka waa in la sameeyaa kaas oo ka shaqayn doona dhammaan gobollada dalka, inkasta oo arrintani ay u baahnaan doonto in loo qorsheeyo lacag ku baxda hawlahay ay qabanayaan iyo wakhti ku filan.

### Hubinta codbixiyaha

- Inta laga helayo diiwaan lagu kalsoonaan karo oo sax ah ee Somaliland, way adkaanaysaa in laga xakameeyo in ay isu diiwaan galiyaan codbixin dadka da'doodu ka yartahay qaangaadhnimada. Si kastaba ha ahaatee waxaa tan yarayn kara tababarka ay qabaan shaqaalahay Hay'adda Doorashoooyinka, kuwaas oo kala saari kara qofka gaadhey da'da iyo qofka aan wali gaadhin. Waana in feejignaan dheeraad ah loo yeeshaa arrinkan.

### Ku xisaabtanka qabiillada laga tirabadan yahay iyo beelaha aan awoodda badan lahayn

- Caaqillada qabiillada dega degaanka Isdiwaangelintu shaki la'aan iyagaa ayaa maamula diiwaangelinta codbixiyaha ee degaanka, ma'adaama ay ogyihiin dhammaan reeraha ka tirsan qabiilkas. Arrinkani mararka qaarkood wuxuu noqdaa caqabad ka dhex aloosanta jifooyinka hoose ee isla qabiilka. Sanaag ayaa noqonkarta tusaale: iyada oo ay hore cabasho uga soo gudbiyeen diiwaangaliyayaashu, carrabaabeenna in caaqilladu ay waxba ka qaban kari waayeen dhowridda habsamida diiwaangelinta codbixiyayaasha.